# Baaritaanka Caafimaadka Dhimirka ee loo Adeegsado BESS

## WAALIDKA/MASUULKA/DARYEELAHA - SU'AALAHA BADANAA LA ISWAYDIIYO

### Waa maxay baaritaanka caafimaadka dhimirka ee guud?

Baaritaanka guud ee shucuurta bulshanimada iyo caafimaadka dhimirku wuxuu baxshaa qaab nidaam, oo degdeg ah, lana isku halayn karo oo lagu qiimeeyo awoodaha habdhaqanka iyo shucuurta iyo heerka khatarta ku imaan karta carruurta iyo kurayda.

Denver Public Schools waxay adeegsataa Nidaamka Baaritaanka Dhimirka iyo Shucuurta ee BASC-3 (BASC-3 BESS ama "BESS") si loo sameeyo baaritaanka guud ee dhammaan ardayda.

Ujeedada tijaabada *dhammaan ardaydu* waa in la dhaqan gasho qaab xili hore lagu ogaan karo baahiyaha ardayda. Xogta kasoo baxda natiijooyinka guriga baaritaanka ayaa loo adeegsadaa in go'aano lasoo saaro loona siiyo ardayda helitaanka cawimaadaha ku haboon ee ku aadan tixgelinnada tusmada ee la xiriira heerka taageerada, mudada, iyo noocyada caawimaadaha iyo adeegyada.

Si lamid ah sida ardaydu uga qaybgalaan baaritaannada guud ee aragga, maqalka, caafimaadka jirka, akhriska, iyo aagaga kale ee tacliinta, BESS ayaa bixinaaya tilmaan ku aadan heerka khatarta caafimaadka dhimirka ee ardayga. Baaritaanka ayaa sahlaaya aqoonsiga xili hore ee taageerooyinka gacanta ka gaysanaaya khatarta hadda iyo tan mustaqbalka ee caafimaadka dhimirka ardayda.

Baaritaanka guud ee caafimaadka dhimirka iyo shucuurta bulshanimada ayaa sidoo kale ka caawinaaya hogaamiyaasha dugsiga aqoonsiga dhacdooyinka ku xeeran fasallada, casharada, ama kooxaha ardayda. Farsamooyinka dugsiga oo dhan ama heer fasal ayaa la badelay si qaab wanaagsan loogu daboolo baahiyaha qaab macno leh oo aan si buuxda ugu tiirsanayn hanaanka tixraaca caadiga ah.

Barnaamijka 2021 ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka ee *Taageerada Bulshada, Shucuurta, Habdhaqanka, iyo Baahyaha Caafimaadka Dhimirka rr Ardayda iyo Ilmaha (Supporting Child and Student Social, Emotional, Behavioral, and Mental Health Needs)* ayaa si gaar ah ugu taliyay in degmooyinka dugsigu "ay dhaqan gasnaan hanaanka baaritaanka dhisan oo balaaran ee guud si loo daboolo baahiyaha shaqsiga ah iyo kuwa banaanka ee ardayda...sadex jeer sanad kasta..." (bogga 34). Dhakhtarka Guud ee Qaliinka Mareykanka ayaa shaaciyay *masiibada caafimaadka dhimirka ee dhalinyarada* wuxuuna ku taliyay in macalimiinta "ay siiyaan taageerooyin joogto ah si loo daboolo baahiyaha caafimaadka dhimirka ee ardayda". Baaritaanka guud ee caafimaadka dhimirka waa qaab kahortag leh oo nidaameed oo lagu go'aansho taageerooyinka ku haboon ardayda.

Gudaha DPS, waxaan haysanay Nidaamka Baaritaanka Dhimirka iyo Shucuurta (BESS) oo la isku haleyn karo ilaa 2016, waxaana marhoreba aasaas adag u dhignay baaritaanka guud ee caafimaadka dhimirka.

### Maxaa BESS loo sameeyay si ay u noqoto farsamada baaritaanka guud?

Nidaamka Qiimaynta Habdhaqanka ee Carruurta - Daabacaada Sadexaad (BASC-3) ayaa ah mid kamid ah farsamooyinka baaritaanka ee habdhaqanka, bulshada iyo shucuurta, ee labadaba DPS, iyo degmooyinka kale ee dugsiga, iyo xarumaha kaladuwan ee dugsiga ka baxsan.

BESS waa aalada baaritaanka ee BASC-3, iyo BASC-3 Flex ayaa ku jira hawsha aalada kormeerka oo waafaqsan natiijooyinka baaritaanka waxaana heli kara bixiyaasha caafimaadka dhimirka ee DPS.

BESS ayaa si degdeg ah loogu dhamaystiri karaa aalada oonlaynka ah ee sida fudud lagu geli karo. Waxaa lagu heli karaa luuqado badan, waxayna sahlaysaa fikradaha dhinacyada badan (ardayda, macalinka, iyo fikrada waalidka/masuulka) taasoo sawir balaaran ka bixinaysa shaqada faya qabka shucuurta iyo caafimaadka dhimirka ee ardayda.

DPS ayaa adeegsaneysay BESS ilaa sanadkii 2016, aqoon ayayna u leeyihiin arday badan oo DPS kamid ah, qoysaska, iyo shaqaalaha. Dukumiintiyada hagaaya DPS, taageerada shaqaalaha, iyo wbarashada xirfadaha ayaa horey loo sameeyay waxaana loo qoondeeyay maamulka iyo qiimaynta BESS.

## Muddo intee dhan ayay qaadan doontaa intee jeer ayaanse u baahan karnaa inaan tijaabo ku samayno ardayda?

DPS waxay leedahay sadex xiliyada baaritaanka BESS ah: mid waa xiliga Dayrta, midna waa Jiilaalka, halka kan kale yahay Gu'ga. Ardayda ayaa la baari doonaa xili baaritaaneed kasta. La xiriir dugsiga ardaygaaga si aad u ogaato taariikhaha rasmiga ah ee ay dhamaystiri doonaan baaritaannada.

Hal kamid ah Warbixinta Ardayga ee Gaarka ah ayaa lagu dhamaystiri karaa ku dhawaad 10-15. Haddii loo buuxsho fasalka oo dhan (ayagoo ku jira aaladaha shaqsiyaadka ah ee sirta), waxaa lagu qiyaasayaa inay qaadato ku dhawaad 25-30 daqiiqo. Macalimiinta iyo waalidiinta/daryeeleyaasha ayaa buuxin kara nuquladooda foomka baaritaanka ku dhawaad 5 daqiiqo gudahood calaa cunug.

## Sidee ayaan ku buuxin karaa foomka waalidka/daryeelaha ee BESS?

Waalidiinta/masuuliyiinta/daryeeleyaasha ayaa ka geli kara Foomka Warbixinta Waalidka lifaaqaan. Kooxaha dugsiyada ayaa abuuri kara lifaaqyada lasoo gaabshay si loo taageero buuxinta foomka waalidka. Waalidiinta/daryeeleyaasha ayaa u baahan doona inay haystaa **labarka kaarka aqoonsiga ardaygooda iyo taariikhda dhalashada** si ay u galaan foomkaan.

## Ka waalid ahaan, miyaan akhrin karaa su'aalaha kahor intaan ardaygaygu tijaabada marin?

Haa, waalidiinta/daryeeleyaasha ayaa akhrin kara tijaabada ayagoo kaashanaaya shaqaalaha ayagoo taleefan kula hadlaaya ama toos ugu imaanaaya. Nuqul faaruq ah **looma** diri karo guriga sabab la xariirta xadidaadaha xaquuqda daabacaada.

## Haddii khatar heer sare ah lagu ogaado qiimaynta BESS, tani ma tahay in xanuunka laga helay?

Maya, BESS **ayaan** loo aqoonsan doonin qiimayn baaritaan oo balaaran. Taas badelkeed, wa aalad loo adeegsan karo go'aaminta heerka khatarta ardaygu ugu jiro qaadista caqabadaha shucuurta iyo/ama dhimirka oo u baahan kara caawimaad. Marka ay helayaan natiijooyinka BESS, kooxaha dugsiga ayaa laga doonayaa inay aqoonsadaan ugu yaraan hal xirfadalaha dhimirka ee dugsiga ah, (shaqaalaha bulshada ee dugsiga DPS, dhakhtarka dhimirka dugsiga, iyo/ama xirfadlaha dhimirka dugsiga ee shaqo baradka ah) oo ah xubin muhiim u ah kooxda si uu u taageero turjumaada natiijooyinka iyo aqoonsiga caawimaada/adeegga. Haddii dugsi lagu wargeliyo in arday uu qabo naafo ama looga shakiyo in arday uu qabi karo naafo, waa Masuuliyad Ka saaran Child Find inay sameeyaan qiimayn sida ku cad IDEA iyo/ama Qaybta 504.

## Ma u diidi karaa ardaygayga inuu ka qaybgalo tijaabada BESS?

Haa. Ka waalid/masuul ahaan, waad u diidi kartaa ardaygaaga inuu ka qaybgalo buuxinta Foomka Warbixinta Shaqsiga ah ee Ardayga. Foomkaan diidmada ayaad ku buuxin kartaa galalka diiwaan gelinta oonlaynka ah ee dugsiga iyo/ama Barta Waalidka. Haddii aad dooneyso inaad ka laabato diidmada aadna taas badelkeed doonayso in cunugaagu uu buuxsho foomka Warbixinta Iskaa ah ee Ardayga ee BESS, la xiriir dugsiga cunugaaga. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa dugsiga cunugaaga haddii aad dooneyso xaqiijinta diidmada.

## Maxaa dhacaaya haddii natiijooyinka BESS ee ardaygayga ay muujiyaan khatarta dheeriga ah?

Xubin kamid ah kooxda dugsiga ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuugu sheego natiijada iyo talaabooyinka xiga ee la qaadi karo. Cabirada qiimaynta dabagalka ah ayaa la muujin karaa. Ogolaanshaha la saxiixay ee waalidka/masuulka ayaa loogu baahan yahay qiimaynta dedaalka/kartida ardayga.

Haddii shaqaalaha dugsiga, oo kaashanaaya fikirka shaqaalaha bulshada ee DPS, dhakhtarka dhimirka dugsiga, ama shaqaalaha tababarka ku jira ee dhimirka dugsiga, uu go'aansho in caawimaada/adeegga shucuurta bulshanimada ama caafimaadka dhimirka ay ku haboon yihiin ilmahaaga, wuxuu kula wadaagi doonaa Qorshaha Shucuurta Bulshanimada/Caafimaadka Dhimirka (SEMH). Qorshaha SEMH ayaa qeexaaya nooca adeegga/caawimaada iyo qiimaynta ama aaladaha la socoshada hormarka ee la adeegsan doono. Ogolaanshaha waalidka/masuulka ayaa loogu baahan yahay si Qorshaha Shucuurta Bulshanimada/Caafimaadka Dhimirku u biloowdo.

Arday kasta oo aan lahayn Qorshaha IEP/Qaybta 504 oo hela taageerada iyo/ama adeegyada shucuurta bulshanimada ama caafimaadka dhimirka labo jeer ama ka badan oo kaladuwan, shaqaalaha bulshada ee dugsiga, dhakhtarka dhimirka dugsiga, iyo/ama tababartaha caafimaadka dhimirka ee dugsiga, ayaa abuuri doona oo joogtayn doona qorshaha Shucuurta Bulshanimada/Caafimaadka Dhimirka oo qeexaaya nooca, qaabka, iyo mudada la filaayo inuu socdo caawimaada ardayga la siinaayo.

Haddii adeegyada lasii wado wax ka badan lix asbuuc ayadoo aan la buuxin shuruudaha joojinta qorshaha ama haddii uu uga shakiyo kooxda dugsigu in ardaygu uu qabi karo naafo sida ku cad Qaybta 504 (uu qabo naafada jirka ama dhimirka oo si wayn u xadideysa shaqada muhiimka u ah nolosha), dhakhtarka ku qoran Qorshaha Shucuurta Bulshada/Caafimaadka Dhimirka waa inuu si dhow ula socdaa in ardaygu leeyahay walaacyo taagan oo kamid ah qaybaha waajibaadka Child Find ee ku degsan xeerka DPS ee JB-R-1.